

# Soo Sheeg Naceybka/Midabtakoorka

Xubnaha bulshadu waxay u sheegeen Washington State Commission on Asian Pacific American Affairs (CAPAA) dhacdooyin necbaansho oo beegsanaaya dadka kasoo jeeda Eeshiya iyo Islander (API) isir ahaan inta lagu jiro xanuuna COVID-19. Nasiib daro, CAPAA ma sameeyso shaqo kiis, aa ma bixiso talo sharci. Waxaanu ku dhiirigalinayaa dhamaan dhibanayaasha ficilada necaybka in ay qaadaan talaabooyinkan soo socda:

**Hel caawimo caafimaad, haday daruuri tahay.**

**Qoro dhamaan faahfaahinaha danbiyada isla iyo ka dib dhacdada.** Ku dar danbi caawiyayaha[yaasha] jinsiga, da'da, dhererka, isirka, miisaanka, dharka iyo astaamaha kale ee gaarka ah. Hadii wac hanjabaad ama faalo dhan u janjeedha la sameeyey, ku dar warbixinta.

**Samee warbixin.** U sheeg dhacdada sharci dhaqan galinta deegaankaaga. Hadii dhibanayaashu aanay rabin ay tagaan booliiska, u gudbi warbixin Waaxda Xuquuqda Shacabka/ Binaadamka ee deegaankaaga). Xataa hadii dhacdo aanay buuxin qaacidada danbiga naceybka, waxa wali muhiim ah inaad u sheegtid haayada ay quseyso. Fadlan u tixgali macluumaadka hoose lagu taxay.

Gobolka, wadanka, iyo dawlada magaalada iyo ururada kale waxay badanaa leeyihiin meel lagusoo sheego ficilada naceybka iyo takoorka oo ay ku jiraan, lakiin aan lagu xadidin, khayraadka hoos lagu taxay:

- [Washington State Human Rights Commission](#)  
Sharciga hortiiisa, qofkastaaba wuxuu xaq u leeyahay inuu xor ka noqdo takoorka shaqada, kirada, guryaha dadweynaha, ama markuu raadinaayo dayn iyo caymis. Qof aaminsan in isaga ama iyada lagu takooray wax ka dhan ah shuruucda ilaalisay wuxuu u dacwoon karaa shaqaalayiyaha, kiro bixiyaha, iyo ganacsiyada.
- [King County Office of Civil Rights](#)  
Xafiiskani wuxuu awood u leeyahay inuu la tacaalo cabashooyinka takoorka ee kaliya dawlada Degmada King iyo shaqaalaysiiyayaasha, kiro bixiyayaasha, iyo ganacsiyada qeybaha aan lagu darin degmada King (ka baxsan magaaloooyinka).
- [Seattle Office for Civil Rights](#)  
Xafiiskani wuxuu taageeraa shuruucda kaa ilaalinaysaa xadgudubka takoorka kirada, shaqaaleysiinta, ama meelaha dadweynaha ee xaduudka Seattle.
- [Spokane Police Department: Soo Sheegista Naceybka iyo Danbiyada](#)  
Bogani wuxuu ka kooban yahay macluumaadka khuseeya waxa danbiga naceybku yahay, iyo sida loo soo sheego.
- [City of Spokane's Human Rights Commission](#)  
Halkani waa halka lagalaso xiriiri karo hadii aad degan tahay Magaalada Spokane. Bog ka kooban macluumaadka kala duwan ee noocyada cabashooyinka.
- [Spokane County Human Rights Task Force Foomka Warbixinta Dhacdooyinka Naceybka](#)  
Halkani waa halka ku haboon xiriirka hadii aad degan tahay meel ka baxsan Degmada Spokane.

Usoo sheeg dhacdada haayadahan soo socda si aad wax u ogeysiisid dadweynaha waxa dhacaya oo siyaada aad u qaabaysid. Waxaad tagi kartaa:

- [Kasoo Horjeedso Naceybka](#)  
Asian Americans Advancing Justice waxay dabo galayaan dhacdooyinka dhan u janjeedha. Iyagoo la wadaagaya waxaad waajahday ama aragtay, waxaad wax ka bari kartaa dadweynaha, awoodsiin kartaa kuwa kale, u muujin kartaa adeeg bixiyayaasha halka u baahan caawimo, xoojin kartaa dadaalada jawaabaha naceybka iyo ka hortaga. Foomamku waxay diyaar ku yihiin Ingiriisi, Jayniis (Caadiya & fudud), Korean iyo Vietnamese.
- [AAPI Foomka Dhacdada Naceybka](#)  
OCA – Asian Pacific American Advocates waxa ka go'an kor u qaadista badqabka bulsho, siyaasadeed, iyo dhaqaale ee Eeshiyaan Mareykanka iyo dadka degan Pacific Islanders (AAPIs). Gudbinta dhacdooyinka naceybka foomkani waxay naga caawinaysaa OCA – Asian Pacific American Advocates in ay la socdaan naceybka ku aadan AAPIs ee wadanka oo dhan.
- [Jooji Naceybka AAPI](#)  
Asian Pacific Policy and Planning Council (A3PCON) iyo Chinese for Affirmative Action (CAA) waxay sameeyeen xaruntan warbixinta si loogu saamaxo xubnaha bulshadu in ay kusoo sheegaan dhacdooyinka naceybka ay waajeheen. Macluumaadka shakhsiyada, oo ay ku jiraan faahfaahinta aqoonsiga gaarka ah, waa la asturi doonaa waxaanan lagula wadaagi doonaa uun fasax. Si guud, macluumaadka waxa loo isticmaali doonaa caawimo, olole iyo waxbarasho. Foomamku waxay diyaar ku yihiin Ingiriisi, Vietnamese, Shiine, Koori, Khmer, Thai, Jabaaniis.

Ugu danbeyntii, Human Rights Campaign (HRC) waxay leedahay tilmaamta dhibanayaasha danbiyada naceybka: [Maxaa La Sameeyaa hadii aad ahayd Dhibane Danbi Naceyb.](#)